



(limaanku waa dhowr iyo todobaatan ama dhowr iyo lixdan qaybood, waxaana ugu fadli badan hadalka: (laa ilaaha Illa-Ilaah), waxaana ugu yar jidka oo wixii dhib ah laga qaado

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: (limaanku waa dhowr iyo todobaatan ama dhowr iyo lixdan qaybood, waxaana ugu fadli badan hadalka: (laa ilaaha Illa-Ilaah), waxaana ugu yar jidka oo wixii dhib ah laga qaado, xishoodkuna waa qayb ka mida iimaanka).

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu sheegay in iimaanku qaybo iyo laamo badan yahay, kuwaasoo ka kooban acmaal laqabto, caqiido, hadalo. Waxaana ugu sareeya qaybaha iimaanka u guna fadli wayn hadalka: (laa ilaaha Illa-Ilaah), waa in macnaheeda aqoon loo leeyahay, laguna camal falayo waxay u taagan tahay, oo ah inuu Ilaahay yahay Ilaaha kaliya ee xaqa u leh in la caabudo keligii, wax kalana aan lala wadaajin. Qaybta ugu yar laamaha iimaanku waa in laga leexiyo wixii dhib ku ah dariiqa dadku marayaan. Rasuulku scw ka dib wuxuu sheegay in xishoodku qaybaha iimaanka ka mid yahay, waana dhaqan ku dhalinaaya qofka inuu wanaaga sameeyo xumaantana ka tago.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/6468>

